

Imaanshaha/Soo Xaadirista iyo Akhris-Qoraalka Hore: Korinta Akhriyeyaal & Qoraayaal Xooggan

Marka ardaydu si joogto ah u soo xaadiraan dugsiga, waxay helayaan fursado badan oo ay ku bartaan sida wax loo akhriyo, loo qoro, loona fahmo dunida ku hareeraysan. Xirfadaha wax akhriska ee hore waxay ka caawiyaan ardayda maaddo kasta. Xirfadahaan waxaa ku xiran guusha dhammaan mahadhadooda dugsiga iyo noloshooda. Maqnaanshaha keliya dhawr maalmood bishiiba waxay ku adkeyn kartaa ardaygaaga inuu la qabsado casharrada ama ardayda intooda kale, gaar ahaan marka uu baranayo wax akhriska.

Sababta Soo Xaadirista Joogtada ahi ay Muhiim ugu tahay Wax Akhriska & Wax Qorista

- Joogitaanka dugsiga waxay ka caawisaa ardayda inay dareemaan inay ka tirsan yihiin dugsiga. Marka ardaydu dareemaan badbaado, soo dhawayn, iyo kamid ahaansho, waxay u badan tahay inay ku faraxsanaadaan waxbarashada oo ay rabaan inay dugsiga yimaadaan.
- Wax ku celcelinta maalinlaha ah waxay caawisaa dhisidda xirfado wax akhris oo xooggan. Ardaydu waxay wax akhriska ku bartaan dhegaysi, hadal, qoraal, iyo wax ku celcelin maalin kasta.
- Ardayda dugsiga ka baaqda waxay seegaan casharo muhiim ah. Macallimiintu waxay qorsheeyaan hawlo salka ku haya kuwii ka horeeyay. Way ku adag tahay ardaydu inay wax fahmaan haddii ay seegeen barashada tillaabooyinkii horeeyay.

Barashada Wax Akhriska Waa Dadaal Kooxeed

Waalidiinta, awoowayaasha iyo ayeeyayaasha, mas'uuliyiinta, xubnaha ballaaran ee qoyska iyo daryeelayaasha ayaa ah macallimiinta iyo sheekeeyayaasha ugu horreeya ee uu ardaygu haysto; waxay saameyn weyn ku leeyihiin safarka akhris-qoraalka ee qofka da'da yar. Qoysaska, dugsiyada, iyo bulshooyinka dhamaantood waxay qayb ka ciyaaraan in ardayda da'da yar laga caawiyo in markay koraan ay noqdaan kuwa wax akhriya oo wax qora. Halkan waxaa ah fikrado dhowr ah oo lagu taageerayo akhris-qoraalka marka la joogo guriga. Fadlan fikrado badan ka hel [Akhris-qoraalka iyo Luuqadda marka la joogo Guriga iyo marka la dhex joogo Bulshooyinkayaga](#).

- Kala hadal ardaygaaga waxa uu baranayo, adigoo weydiinaya su'aalo ay ka mid yihiin:
 - Maxay ahayd qaybta ugu wacnayd maalintaada? Maxaad wax ka akhriday maanta?
 - Ma jiraa wax kugu adkaaday maanta? Sideed u maareysay?
- Wax ku wada akhriya guriga, idinkoo adeegsanaya luuqad un tii ay ahaataba, xitaa ha noqoto dhowr daqiiqo maalintii.
 - Weydii bartahaaga su'aalo ku saabsan waxa aad wada akhriseen.
- Dhiirigeli heesida, laxan-qaadida, qaafiyada, sheeko-sheekaynta, kor wax u akhrinta iyo waxyaabo kale oo badan. Hawlahan farxadda leh waxay ka caawiyaan ardayda yaryar inay yeeshaan xirfado muhiim ah sida barashada erayo cusub, maqalka dhawaaqyada erayada, iyo fahamka sheekooyinka
- Weydii macalinka ardaygaaga sida aad u taageeri karto waxbarashada iyo soo xaadirista inta guriga la joogo. Wada shaqayntu waxay ku siin kartaa aalado iyo fikrado waxtar leh. Macallinku waxaa uu kula wadaagi karaa waxa bartahaaga yar uu si fiican u qabanayo iyo meelaha uu uga baahan karo taageero dheeraad ah. Marka qoysaska iyo dugsiyadu wadaagaan macluumaadkan, waxaa fududaaneysa in laga caawiyo akhriyayaasha hore/yaryar inay koraan oo ay guuleystaan sanadka oo dhan.
- Ku xidhnow kooxaha deegaanka sida maktabadaha, barnaamijyada daryeelka ilmaha, iyo xarumaha wax akhriska.

Carruurto waxay barashada akhris-qoraalka ku bilaabaan guryahooda iyo bulshooyinkooda, halkaas oo luuqadda, dhaqanka, iyo aqoonsiga ay xaqiijiyaan qoysaska iyo daryeelayaasha kuwaas oo ah macallimiinta iyo sheekeeyayaasha ugu horreeya ee muhiimka ah.
QAAB-DHISMEEDKA AKHRIS-QORAALKA HORE EE OREGON, p 5.

Arday kastaa waxaa uu noqon karaa wax akhriye iyo wax qoraa xooggan waxaana uu u qalmaa fursad uu kaga qaybqaato waxbarashadiisa. Dhaqanka gaarka ah ee ardaygaaga, sooyaalkiisa, khibradahiisa, iyo aqoontiisa ayaa ah awoodo muhiim ka ah gudaha fasalka iyo dugsiga. Qoysaska iyo daryeelayaasha ayaa ah shuraakooyin muhiim u ah taageerada waxbarashada ardayga. Wax akhriska iyo soo xaadirista joogtada ah waa masuuliyado la wadaago, waxaana rabnaa inaan ka wada shaqayno guusha nolosha ardaygaaga oo dhan.